



## **WAR SAXAAFDEED KU SAABSAN ARIMAHA DOORASHADA KGS**

Kulan is xog waraysi iyo wada tashi ah oo ay isugu yimaadeen musharaxiinta madaxwaynaha KGS, ayaa la isla falanqeyay habsami u socodka doorashada madaxweynaha KGS, iyo arimaha laxariira amniga, waxaana laga soo saaray qodobadda hoose:

1. Waxaan u mahadcelinaynaa guud ahaan bulsho-weynta KGS ee jooga dalka iyo dibaddiisa sida wanaagsan oo ay u garab istaageen is bedelka iyo in ay muhiim tahay in la helo isbeddel buuxa oo ku yimaadda doorasho xor iyo xalaal ah, isla markaana aan laga hor istaagin mushaarax gaar ah.
2. Waxaan soo dhoweynaynaa go'aanka Guddoomiyaha Baaraalamaanka Federaalka Mudane Maxamed Mursal ee uu ku baaqayay in doorashadu ku dhacdo si cadaalad ah isla markaana aan laga reebin cid gaara.
3. Waxaan aad uga walaacsannahay falalka amni darrada ee ku soo kordhay magaalada Baydhaba maalmihii la soo dhaafay, iyadoo qaraxyo lala beegsaday dad masuuliyiin iyo shacabba leh, falalkaas oo aan aaminsannahay in ay ka danbeeyaan dad ka soo horjeeda nabadda iyo xasilooniida ay haystaan shacabka KGS.
4. Waxaan cambaaraynaynaa falalka mas'uuliyad darada ah ee ay ku kacayaan xubno ka mid ah golaha wasiirada KG kuwaasoo xilkoodu yahay sii hayayaal hadana ku kacaya falal u horseedi karo xasilooni daro. Waxaan ugu baaqanaynaa golaha wakiilada KG inay talaabo sharci ah ka qaadaan xubnahaasi.
5. Musharaxiinta Golaha Isbeddel-doonka waxa ay aad uga walaacsan yihiin in Ku simaha Madaxweynaha KGS xilkiisa ku ekaa 7/12/12, isagoo xilka hayay muddo bil ah, isla markaana suuragelin waayay in ay doorashada ku dhacdo muddo bil ah sida dastuurku qabo.
6. Musharaxiinta Golaha Isbeddel-doonka waxay bulshada KGS iyo Beesha caalamka la wadaagayaan, in laga bilaabo 8/12/12 Maamulka KGS galayo khal-khal dastuuri ah (constitutional crisis) isla markaana aanu ku simaha madaxweynaha sifo sharci ah ku joogin xafiiska madaxweynaha.

7. Musharixiinta Golaha Isbeddel-doonka waxay ugu baaqayaan Guddoomiyaha Baarlamaanka KGS Mudane Abdulqadir Shariif Sheekhuna diyaariyo qaraar baarlamaani ah isla markaana uu horgeeyo baarlamaanka sida ugu dhaqsiyaha badan si uu xilka u hayo inta madaxweyne laga dooranayo, inta ka horeysana uu banneeyo xafiiska madaxweynaha.
8. Musharixiinta Golaha Isbeddel-doonka ah waxay ku baaqayaan inta laga dooranayo Madaxweynaha in la sameeyo Gole Ku meel gaar ah oo loo wada dhan yahay, kaasoo suuragelinaya in doorashadu ku dhacdo jawi la isla oggol yahay.
9. Waxaan Dowladda dhexe ugu baaqaynaa in ay joojiso fara gelinta, dibna u celiso ciidank ay magaalada baydhaba keentay, kuna kalsoonaato doorashada, iyadoo ciddii ku soo baxdana siisa kalsooni iyo wadashaqayn buuxda.
10. Musharixiinta waxay ugu baaqayaan dhamman Bulshada KGS in laga fogaado wax allaale wixii abuurka kara xadgudub sida dacaayadaha baraha bulshada, beenta, war xumo tashiilka iwm.
11. Waxaan ka codsanaynaa in beesha caalamka, IGAD, AU, US, EU, UK, ay goob joog iyo korjoogtaba ka ahaadaan doorashada madaxweynaha KGS ee dhacaysa 19ka December 2018.
12. Dhammaan musharixiinta golaha isbeddel-doonka ah waxa ay ugu baaqayaan bulsho weynta KGS gaar ahaan magaalada Baydhaba in laga wada shaqeeyo sugidda ammaanka deegaanka, islamarkana lala shaqeeyo laamaha ku shaqada leh amniga ee deegaanada KGS.
13. Ugu danbayn, musharixiinta waxa ay bulsho weynta KGS iyo guud ahaan dalka ay u cadaynayaan in ay la wada shaqayn doonaan cid allaale ciddii si xor iyo xalaal ugu guulaysata doorashada madaxweynaha KGS, ayna kala shaqayn doonaan horumarinta iyo dib u dhiska deegaanada KGS si shuruud la'aan ah.

**Musharixiinta:**

*Baydhabo, 6 Dec 2018.*

- **Dr. Ibrahim Macallin Nuur.**
- **Sheikh Mukhtar Roobow ( Abuu Mansuur).**
- **Aadan Maxamed Nuur ( Saransoor).**

**=D H A M M A A D=**